

Ku soo dhawoow adeegyadaada cusub!

Waxaan rabnaa inaad ogaato waxa muhiimka ah.

Shuruucda Daryeelka La-caawiyo (Assisted Living) ee Minnesota waxay farayaan in qof kasta oo helaya adeegyo daryeel la-caawiyo, oo ay ku jiraan hoyga, uu yeesho Qorshaha Ka-hortagga Dhibaateynta Shakhsiyeed (Individual Abuse Prevention Plan – IAPP). Waxaan ku weydiinaynaa su'aalahan sababtoo ah dhammaan shaqaalaha ka shaqeeya xaruntan waxaa saaran waajib sharci ah oo ah in ay soo sheegaan tacaddiga, dayacaadda, ama ka faa'iideysiga dadka nugul. Qorshaha ka soo baxa su'aalahan waxaa loogu talagalay inuu ku taageero adiga markaad u guureyso oo aad ku raaxeysaneyso gurigaaga cusub.

Waa maxay IAPP?

Tani waa qorshe adiga iyo adeegbixiyahaaga si wadajir ah u diyaarin doona. Qorshahani waa aalad muhiim ah oo adeegbixiyaha u adeegsan doono hubinta in aad ka badbaado tacaddi haddii halistaas la aqoonsado. Diyaarinta IAPP-ga waxay u baahan tahay wada hadal daacad ah oo adiga iyo adeegbixiyaha dhex mara, kaas oo lagu falanqaynayo taariikhdaada, halista hadda jirta iyo tan mustaqbalka, iyo sida uu adeegbixiyuhu kuugu caawin karo ilaalintaada. Qorshaha wuxuu noqon doonaa mid si gaar ah adiga loogu habeeyey, iyadoo lagu saleeyo baahiyahaaga.

Maxaa ku jira IAPP-ga?

- **Tacaddiga Jirka** — garaacid, feerid, riixid, faro-ku-qabatin, dharbaaxid, jiidid.
- **Tacaddiga Afka** — in lagu ceebeeyo dadka kale hortooda; in laguugu yeero magacyo aflagaaddo ah sida “doqon,” “nacayb leh,” ama “waxba kama jiraan”; in laguula hadlo si cabsi gelin ah; in laguugu hanjabo adiga, dadka aad jeceshahay, ama xayawaannadaada; in qofka kuu hanjabo inuu is-dhaawacayo marka uu kaa caroodo.
- **Tacaddiga Galmada** — taabasho aanad rabin, isku dayo galmo oo aan la oggolayn, ku qasbid falal galmo, ama kufsi.
- **Ka Faa'iideysiga Maaliyadeed** — xatooyo hanti, adeegyo ama lacag; ku adeegsiga xiriir ama kalsooni si lacag loogaaga helo; khiyaamooyin maaliyadeed oo lagu beegsado waayeelka ama dadka nugul.
- **Dayacaad** — in aad iska dhaafto cunista cuntada ilaa ay keento nafaqo-xumo; in aad qaadan weydo daawooyinka lagu qoray ilaa ay sababaan dhibaato caafimaad ama isbitaal dhigasho; in aanad samayn daryeelka nadaafadda ee lagama maarmaanka u ah ilaa uu khatar ku geliyo caafimaadkaaga iyo fayoaqabkaaga.

Haddii waxyaabaha kor ku xusan aysan adiga khusayn, waxa lagu calaamadeyn doonaa “wax walaac ah ma jiro.”

Waad ku mahadsan tahay waqtiga aad ku bixisay akhrinta macluumaadkan muhiimka ah.

Minnesota Department of Health
Health Regulation Division
PO Box 64579
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4200
health.fpc-web@state.mn.us
www.health.state.mn.us

KU SOO DHAWOOW ADEEGYADAADA CUSUB!

1/06/26

Si aad u hesho macluumaadkan oo ku qoran qaab kale, wac: 651-201-4200.

